WAA MAXAY VCAL?

Victorian Certificate of Applied Learning (VCAL) waa fursad camali ah oo u furan ardayda dhiganaysa sannaddada 11aad iyo 12aad.

VCAL waxay ku siinaysaa khibrad camali ah oo shaqo la xiriirta, iyo sidoo kale xirfadaha aqris-qoraalka iyo xisaabaadka iyo fursad aad ku dhisto xirafado qofnimo ah oo muhiim u ah nolosha iyo shaqadaba. Sida loo aqoonsan yahay Shahaadada Victorian Certificate of Education (VCE) ayaa VCAL-na u tahay shaqhaado la aqoonsan yahay ee dugsiga sare.

Ardayda samaysa VCAL waxay u dhown yihiin inay ahaadaan kuwa daneeya in sii wataan tababar laga bixiyo Technical and Further Education (TAFE), kuwa sameeya xirfad shaqo barasho, ama kuwa hela shaqo marka ay dhammeeyaan dugsiga. Sidaas darteed, haddii aad bilowdo VCAL ka dibna aad goosato ugu dambayntii in VCE uu kuu yahay fursadda saxda ah, ma noqon doonto lagama maaraan inaad beddesho doorashadaada.

Dabacsanaanta VCAL waxay awood kuu siinaysaa inaad qaadato barnaamij ku habboon danahaaga iyo baahiyahaaga waxbarasho. Casharro iyo cutubto si buuxda loo aqoonsaday ayaa loogu doortay afartaan qeybood oo qasab ah:

- Xirfadaha aqris-qoraalka iyo xisaabta
- Xirfadaha la xiriira shaqada
- Xirfadaha u gaarka ah Sancada
- Xirfadaha hormarinta qofnimada

Haddii aad si guuli ku jirto u dhammaysato VCAL-kaaga waxaa heli doontaa shahaado iyo cadayn natiijadii kuwaas oo faahfaahinaya aaggaggii waxbarasho ee aad soo dhmmaysatay.

Waxaan u baahnahay inaan ogaado

Maxaan u dooranayaa inaan sameeyo VCAL?

Inkastoo ay VCE tahay fursad u fiican ardayda jecel in waxbarshaooda ka sii wataan jaamacadda, waxaa laga yaabaa in tani aysan kuu ahayn adiga fursaddii saxda ahayd.

VCAL waa shahaado la aqqonsaday oo dugsiga sare lana sameeyo sannadaha 11aad iyo 12aad. VCAL waxaa lagu saleeyey waxbarsho camali ah, taasoo sidoo kale loo yaqaan “waxbarshada ficil ahaan loo sameeyo”.

Haddii aad doorato inaad samayso VCAL, waxaad heli doontaa khibrad camali ah iyo xirfado shaqo lagu heli karo iyo sidoo kale xirfado aad ugu baahan doonto inaad ku sii wadato tababbaro kale meelaha laga shaqeeyo ama TAFE-kaba.

Halkee ayaan ka samayn karaa VCAL-ka?

VCAL waxaa laga bixiyaa dugsiyada waddanka oo dhan, machadyada TAFE-ka, iyo qaar ka mid ah Xarumaha Waxbarshada Bulshada ee Dadka Waawayn (Adult Community Education (ACE) centres). Ka eeg www.vcaa.vic.edu.au doorana raadi Dugsiga iyo Waxbarsho liiska meelaha bixiya VCAL-ka.

Waa maxay heerarka VCAL-ku?

VCAL-ku wuxuu leeyahay seddex heer – Asaasi, Dhexe iyo Sare. **Maccallinkaaga ama la-taliyahaaga mihnadda ayaa kaa caawin doona inaad go'aansato heerka ugu habboon baahiyagaaga.**

Ma jiraan wax shuruudo gelitaan ah?

Maya. Waxaad ka bilaabi VCAL heerka ku habboon awooddaada. Macallinkaaga ama la-taliyahaaga mihnadda ayaa awoodi doona in kaa caawiyaan in go'aansato heerka aadka kugu habboon.

Ilaa intee muddo ah ayuu VCAL-ku igu qaadanayaa inaan dhameeyo?

VCAL-ka waxaa loogu talo galay ardayda ku jirta sannadaha 11aad iyo 12aad. Waxaad heli kartaa shahaadada VCAL-ka iyo caddaynta natiijooyinka – markaad si guuli ku jirto u dhammayso barnaamijka VCAL-ka oo ah heerka aad dooratay. Arday badan baa ku dhmmaysay heer VCAL ah sannad gudihiis.

Maxaad helaysaa ka dib markaad si guuli ku jirto aad u dhammayso VCAL-ka?

Haddii aad si guuli ku jirto u dhammayso barnaamijka VCAL-kaaga, waxaad heli doontaa shahaado VCAL oo ah heerka Asaasiga ah, heerka Dhexe ama heerka iyadoo ay ku xiran thaay heerkii VCAL-ka ahaa ee aad dooratay inaad dhammayso (qaadato). Waxaad kaloo heli doontaa caddayn natiijooyinka oo ay ku qoran yihiin dhammaan cutubyadii VCAL-ka, VCE-da iyo Vocational Education and Training (VET) ahaa (ee aad soo qaadatay).

Maxaa lagu xisaabayaa VCAL-ka?

Waa maxay shahaada Vocational Education and Training (VET)?

Vocational Education and Training (VET) waxay siisaa fursad dugsiyada, machadyada tababarrada iyo warshaduhu inay si wada jir ah uga shqeeyaan sidii ay ardayda ugu diyaarin lahaayeen shaqo iyo waxbarsho sare. Dugsiyada badankoodu waxay bixiyaan koorssoyin VET ah kuwaasoo qeyb ka qaata dhammaystiridda VCAL-ka waxayna kaloo siiyaan (ardayda) aqoonsiyo VET ah oo waddankoo dhan laga aqoonsan yahay.

Ma la igugu xisaabin doonaa VCAL-kayga waxbarsho VET ah oo aan hore u soo dhigtay?

Haa. Waa inaad kala hadashaa macallinkaaga ama mihnad ka taliyahaaga sidii aad iskula meel dhigi lahaydeen ilaa inta waxbarashadaadii hore lagu xisaabinayo VCAL-kaaga iyo sidii aad u qorshayn lahaydeen inta ka hartay barnaamijkaaga VCAL-ka ah.

Waxaan hore u sameeyey maado VCE ah. Tan ma la igugu xisaabi doonaa VCAL-kayga?

Haa. Haddii aad heshay natiijo 'S' ah oo ku aaddan dhammaystirka si guuli ku jirto cutub VCE ah waxaa laguugu xisaabi doonaa VCAL-kaaga. Waa inaad kala hadashaa macallinkaaga ama mihnad ka taliyahaaga sidii aad u qorshayn lahaydeen inta ka hartay barnaamijkaaga VCAL-ka ah.

Ma u beddelan karaa VCE haddii aan doorashadayda beddelo?

Waa inaad kala hadashaa tan macallinkaaga ama mihnad ka taliyahaaga haddii aad goosatay inaad ka faa'idaysato fursaddaan.

Ma ka shaqayn karaa shaqo waqti dhimman (part-time) ama ma sii wadan karaa tababr horseedaya shaqo anoo ku qoran VCAL-ka?

Waxaad u heli kartaa aqoonsi iyo buundooyin shaqada waqti dhimman (ee aad qabatay) intii ku qornayd VCAL-ka. Shaqadaan waxaa ku jira kara:

- Tababar shaqo horseeda oo ku salaysan dugsiga ama tababar (kale).
- Sahqo waqti dhimman
- Ku meelayn waxbarasho goob shaqo oo qaabaysans.

Sidee loo qiimeeyaa VCAL-ka?

VCAL-ku wuxuu ka kooban yahay koorasyo iyo shahaadooyin la aqoonsan yahay. Barnaamijkaaga VCAL-ka waxaa qiimaynaya macallinkaaga iyadoo la raacayo shuruudaha qiimaynta qeyb kastoo ka mid ah barnaamijka.

Ma u baahnahay in aan galo imtixaanka General Achievement Test (GAT)?

GAT-ku waa imtixaan aqooneed iyo xirfadeed oo ka kooban qoraal, xisaab, saynis iyo farsamo, barashada insaaniyadda sayniska arrimaha bulshada iyo fanka. Waxaa sameeya ardayda oo dhan oo samaynaya ha lama in kabadan cutubyada 3aad iyo 4aad ee VCE-da. Ardayda samaynaysa cutubyada 3aad iyo 4aad ee la saxo waxaa kaloo looga baahan yahay inay u fariistaan imtixaanka GAT. Ardayda ku qoran inay qaataan cutubyo VCAL ah oo kaliya lagama rabo inay u fariistaan imtixaanka GAT. Hase ahaatee, waad dooran kartaa inaad u fariisato imtixaanka GAT haddii uu ku habboon yahay dariiqa aad u marayso waxbarsho dheeraad ah, tababbar ama shaqo.

Maxaan baranayaa?

Ayadoo uu ku caawinayo macalinkaagu ama la-taliyahaaga mihnadda, waxaad samayn kartaa barnaamij VCAL ah kaas oo ku habboon baahiyahaaga iyo danahaaga waxbarasho ee gaar ahaaneed. Waxaad leedahay kala doorashada inaad qaadato cutubyo iyo moojulo oo ka mid ah mid kasta ee qaybahan VCAL-ka ee soo socda kuwaas oo qasab ah:

Qaybta 1aad – Xirfadaha Aqris-qoraalka iyo Xisaabta

Barnaamijka VCAL waa inay ku jirtaa maaddooyinka aqris-qoraalka iyo xisaabta. Kuwaasna waxaa laga dooran karaa cutubyada xirfadaha aqris-qoraalka iyo xirfadaha xisaabta iyoIngiriisiga VCE iyo daraasadaha waxbarashada kale ee la doortay sida Shahaadada Waxbarashada Guud (Dadka Waaweyn).

Qaybta 2aad – Xirfadaha U Gaarka ah ee Sancada

Barnaamijka VCAL-kaaga ee heerarka Dhexe iyo kuwa Sare waa inay ku jiraan qaybaha shahaadooyinka VET-ka oo qaran ahaan loo aqoonsan yahay. Hase yeeshee, lagaagama baahna inaad xoogga saarto ama dhammaystirto shahaadada VET-ka. Tusaale ahaan, waxaad dooran kartaa inaad qaadato moojulo iyo cutubyo kala duwan oo aad ka doorato shahaadooyinka VET-ka oo ballaaran si aad u kaafiso shuruudaha VCAL-ka, aadna waayo-aragnimo uyga hesho qaybaha xirfad-barashada oo ballaaran. Dariiqooyinka VET-ka ee

ballaaran waa mid baaxad weyn tusaaleyaalka qarkoodna waa baabuurta, ingineerinka, dhismaha, iyo dhisidda, soo-dhaweynta iyo dukaamaysiga, warbaahinta, taknoloojiyada macluumaadka, beeraha, hortikaljarka, hoosooyinka iyo timajarka iyo qurxinta.

Qaybta 3aad – Xirfadaha la xiriira Shaqada

Si loo horumariyo xirfadaha shaqo helidda, VCAL waxay ku siinaysaa kala doorashada ku-meelaynta shaqada qorshaysan, shaqo-barasho/tababar dugsiga-ku-xiran, ama shaqo waqti-dhimman ah. Waxaad kaloo baran kartaa cutubyada iyo moojulada kugu caawin kara u-diyaargarowga shaqada, tusaale caafimaadka iyo ammaanka goobta-shaqada ama xirfadaha wareysiga shaqada.

Qaybta 4aad – Xirfadaha Horumarinta Qofnimada

Ayadoo qayb ka ah barnaamikaaga VCAL waxaad ka qaybgalaysaa mashruucyo iyo nashaadyo bulshadaada ama dugsigaaga ka jira kuwaas oo kugu caawinaya xirfadahaaga koox la shaqaynta, isku-kalsoonaanta iyo xirfadaha kale oo muhiimka u ah nolosha iyo shaqada. Tusaale, dugsigaagu wuxuu la shaqayn karaa dowladda hoose degmadaada si loo horumariyo dhulalka baarkiyada. Waxbarashada aad ka hesho ka qaybgalka mashruucaas waxaa lagu tiring karaa inuu ka mid yahay VCAL-kaaga.

Halkee bay VCAL i-gaynaysaa?

Ma ku geli karaa waxbarashada jaamacadeed haddii aan si guul leh ku dhammaysto VCAL?

Haddii aad ka fakarayso inaad gasho jaamacad markaad dhammayso dugsiga, VCAL khiyaarka VCAL runtii kuguma habboona. Ardayda qorshaynaysa inay galaan jaamacad si caadiga ah waxay sameeyaan VCE taas oo u ogolaanaysa inay ka helaan Darajada Ogolaansha Jaamacadda Australia (ATAR) oo ay bixiso Xarunta Ogolaansha Jaamacadda Victoria (VTAC). Haddii aad baranayso VCAL oo ah heerka Sare (Senior) aad go'aansato inaad inaad jeclaan lahayd inaad gasho jaamacad, ka hubso macalinkaaga ama la-taliyahaaga Mihnadda maaddaama jaamacadaha qaarkood ay tixgelin siiyaan oo ogolaadaan ardayda wadata shahaadada Sare ee VCAL. Hase yeeshee, gelitaanka tooska ah ee laga yimaado dugsiga maahan jidka keliya oo jaamacadda loo maro. Dadka qaarkiis waxay TAFE-ka ka bartaan koorsada waxbarashada mihniga iyo tababarka, taas oo lagga yaabo inay ku qaataan Diblooma ama Diblooma Sare ka diban ay go'aansadaan inay ka sii faai'di karaan koorso jaamacadeed. VCAL waa bilow ku habboon in la sii maro.

Maxay yihiin khiyaaradaydu isla markii aan dhammeeyo VCAL-ka?

VCAL waxay ku siinaysaa waayo-aragnimo shaqada la xiriirta oo la taaban karo iyo shahaadooyin ay aqoonsan yihiin machadyada TAFE-ka iyo shaqaalahu. Sidaas oo kale tan waxay kugu caawinaysaa ka imaanshaha dugsiga oo aad imaanayso shaqada, shaqo-ku-barasho ama tababar iyo tababar dheeraad ah oo laga helo TAFE.

Sidaas baddelkeeda, haddii aad bilowdo barashada VCAL oo ah heerka Foundation ee Sannadka 11aad aadna si guul ahna u dhammayso, waxaad tixgelin kartaa bal inaad dhammayso heerka Dhexe ama kan Sare ee VCAL Sannadka 12aad. Ama waxaad tixgelin kartaa dariiqaaga kale waxaadna gho'aansan kartaa jaamacad inay kuu tahay doorashada saxda intaas oo dhan ka dib, waxaadna u baddalan kartaa VCE.

VCAL-ku ma ii diyaarin karaa inaan galo xirfad?

Haddii aad dhammayso cutubyada VET oo ah qayb ka ah shahaadada VCAL-kaaga waxaad yeelataya aqoontii iyo xirfadihii kuwaas oo loo-shaqeeyeyaashu ay qiimeeyaan, tusaale, ka-warqabka sancada, adeegsiga qalabka looga baahan yahay sancadaas, caafimaadka iyo ammaanka goobta shaqada. Dhammaystirka cutubyada VETwuxuu kugu caawinayaa inaad u muujiso loo-shaqeeyaha inaad xiisaynayso inaad ka shaqayso sancadaas.

Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan VCAL, kala xiriir Haya'dda Manhajka iyo Qiimaynta ee Victoria 1800 134 197 ka eeg www.vcaa.vic.edu.au